



Fariintan ayaa dhawaan lagu faafin doonaa gudaha mareegta English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, Tiếng Việt at <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Oktoobar 20, 2022

Ku socoto: Bulshada Naafanimada Garaadka/Korriinka (I/DD) iyo La Hawlgaleyaasha Qabaa'ilka
Ka socoto: Anna Lansky, Agaasimaha Ku meelgaarka ah, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka
Mawduca: Agaasime ku xigeenka ku meelgaarka ah ee la magacaabay

Waxaan ku faraxsanahay inaan ku dhawaaqo in Acacia McGuire Anderson ay u shaqayn doonto sidii agaasime ku xigeenka ku meelgaarka ah ee ODDS laga bilaabo bisha soo socota. Acacia waxay ii noqon doontaa lammaane weyn xaga hoggaaminta ODDS iyo taageerida kooxda maamulka iyo shaqaalaha inta ay ODHS raadinayso agaasime joogto ah oo lagu beddela Lilia Teninty, taas oo ka tagaysa Nofeembar 10 keeda.

Acacia waxay ugu soo biirtay ODDS sanadkii 2013 sidii isku duwaha ogaanshaha iyo qiimaynta. Sanadkii 2014, waxay noqotay maareeyaha ODDS ee u-qalmitaanka iyo shaqada. Sanadkii 2016, wax yar ka dib markii la garay heshiiskii dejinta "Lane v Brown", waxay aqbashay doorka isku duwaha Koowaad ee Shaqada. Doorkan, Acacia waxay ka shaqeysay dhammaan Dhaqancelinta Farsamada, Waaxda Waxbarashada Oregon iyo shurakooyinka kale si kor loogu qaado fursadaha ku aadan dadka qaba naafanimada garaadka iyo korriinka (I/DD) si ay u raadsadaan shaqo isku dhafan oo tartan leh. Iyadoo helaysa taageerada dad badan, Acacia waxay awood u yeelatay inay kormeerto heshiiska dejinta waxayna ilaalisay u hogaansanaan la taaban karo ilaa laga gaaray wakhtiga [cayrinta](#) oo ahayd Agoosto 12, 2022.

Marka laga soo tago shaqadeeda isku duwaha Koowaad ee Shaqada, sanadkii 2020 Acacia waxay bilowday inay maarayso mashaariic gaar ah,

oo ay ku jiraan maaraynta mashruuca iyo hirgelinta qorshaha jawaabta ODDS COVID-19.

Acacia waxay sii wadi doontaa shaqada isku duwaha Koowaad ee Shaqada si ku meelgaar ah, laakiin waxay caawimaad ka raadsan doontaa kooxda dhexdeeda si ay u hesho hoggaamin dheeraad ah.

Waad ku mahadsan tahay Acacia inaad ogolaatay inay soo gasho doorkan hogaamineed ee muhiimka ah.

Daacadnimo,

Anna Lansky
Agaasimaha Ku Meelgaarka ah
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Kobaca (ODDS)

Farriimaha Agaasimihii Hore ee ODDS waxaa laga heli karaa barta <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo [booqo mareegtayada](#).

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad balaaran, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir Oregon Office of Developmental Disabilities Services lambarka 503-945-5811. Waxaan ka aqbalnaa wicitaanada dhammaan noocyada adeegga gudbinta ee loogu talagalay dadka dhegoolaha ah, kuwa dhegaha-indhaha la', kuwa dhego culus ama leh naafo xagga hadalka ah. Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegga gudbinta booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.